



Dugsiyada Dadweynaha ee Willmar

Dr. Jeffrey Holm, Kormeeraha Guud

Dhiirrigelinta iyo u-diyarinta dhammaan bartayaasha mustaqbalkooda bulshadeena iyo adduunkeenna

Waad salaaman tahay,

Dugsiga Dadweynaha ee Willmar wuxuu tixgeliyaa badbaadada iyo amniga shaqaalaha iyo ardayda mid kamid ah waajibaadkayada ugu muhiimsan. Waxaan dejinay habab badan si aan uga ilaalino ardaydeena iyo shaqaalaheena waxyeelada. Dhammaan dhismayaasha iskuulladu waxay leeyihiin qorshayaal iyo habab nabadgelyo, waxaan dib u eegaynaa qorshooyinka iyo geeddi-socodka si joogto ah si looga fiirsado hagaajinta.

Sababtoo ah nabadgelyadu waa muhimadda koowaad ee dugsiyadeenna, waxaan qandaraas la galnay Magaalada Willmar in saraakiil booliis ah (saraakiisha kheyraadka dugsiga) loo qoondeeyo dhismayaasha dugsiyeenna. Haysashada saraakiisha kheyraadka dugsiga oo jooga dhismayaasha iskuulka kaliya kuma caawineyso nidaamka dugsiga arrimaha amniga laakiin sidoo kale waxay u oggolaanaysaa ardayda inay xiriir wanaagsan la yeeshaan saraakiisha booliiska. Waxaan arkay isdhexgal badan oo wanaagsan oo udhaxeeya saraakiisha khayraadka iskuulka iyo ardayda, iyo sidookale shaqaalaheena. Waxaan jeclaan lahaa inaan sharaxo doorka rasmiga ah ee loogu talagalay saraakiisha kheyraadka ee qandaraaska aan kula jirno Magaalada Willmar.

Xubnaha shaqaalaha dugsiga, sida macallimiinta, maamulayaasha, iyo kaaliyayaasha maamuleyaasha, ayaa mas'uul ka ah dhaqangelinta xeerarka dugsiga. Saraakiisha kheyraadka iskuulka waxay kaliya ku lug yeeshaan arrimaha anshaxa haddii dambi la galay. Waxaan aad uga taxaddaraynaa in xubnaha shaqaalaha dugsi ay ka shaqeeyaan arrimaha la xiriira ku xadgudubka sharciga dugsiga, iyo saraakiisha sharci fulinta waxay ka shaqeeyaan kaliya arrimaha laga yaabo inay ku lug yeeshaan falal dambiyeed.

Saraakiisha kheyraadka dugsiyeenna waxay kaloo gacan ka geysan karaan inay ardayda ka wacyi-geliyaan arrimo kala duwan. Waxay barten D.A.R.E. (Waxbarashada U Adagida Xadgudubka Daroogada) barnaamijka ardayda fasalka shanaad sannado badan. Barnaamijkani wuxuu xoojinayaa xulashooyinka iyo dabeecadaha wanaagsan ee ardayda. Ardaydu waxay sameeyaan ballanqaadyo si ay u joogteeyaan caadooyinka iyo dabeecadaha caafimaadka qaba inta ay ku jiraan DAARE barnaamijka iyo mustaqbalka. Ardayda waxaa lagu sharfay xaflad qalin jabin ah markay dhameeyaan barnaamijka.

Dugsiga Dadweynaha ee Willmar wuxuu nasiib u yeeshay inuu heshiis iskaashi la yeesho Waaxda Booliska ee Willmar. Dadaalladeenna isku dhafan ayaa dugsiyadeenna ka dhigi kara kuwo ammaan ah oo ka sii wanaagsan iyada oo loo marayo cilaaqaadka lagu horumariyo iskaashigan. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan sida Degmada Dugsiga Dadweynaha ee Willmar ay uga faa'iideysato saraakiisha kheyraadka dugsiga, fadlan la xiriir xafiiskayga.

Si daacad ah,

Dr. Jeffrey Holm, Kormeeraha Guud